



Talooyin ku saabsan sida carruurta caafimaad ugu lahaadaan guriga



JIMICSIGA IYO MASKAXDAADA

Cilmi-baadhis dhawaan ah ayaa lagu ogaaday in jimicsiga, gaar ahaan firfircoonida leh boodbood ee ay ku jirto qayb ah isku-dabarid, oo ay anfacyo dhaafsan caafimaad-qabka u leedahay dadka da'da yar.

Firfircoonida leh boodbood waa firfircooni kordhinaysa tirada garaaca wadnaha iyo neefsashada. Tusaalaha waxa ka mid ah socod dhakhso leh, socodka dheer, gucleynta/orodka, kaxeynta baasgeel, dabaasha, xadhig-ka-boodka, qoob-ka-ciyaarka iyo fasal ah jimiciga leh boodbood.

Daraasado ayaa lagu ogaaday in dadka da'da yar ee ka qaybgala xiitaa 10 daqiiqadood oo ah jimicisi ka-hor imtixaan ama firfircooni waxbarasho oo kale ay hawlahaas kaga fiicnaadeen dadka da'da yar ee aan sameyn jimicisi. Daraasado kale ayaa lagu ogaaday in dadka da'da yar ee si joogto ah uga qaybgala firfircooni jidh ay leeyihiin guulaysi waxbarasho oo ka fiican ka facooda aan si joogto ahayn u sameyn jimicisi.

FIRFIRCOONIDA GURIGA

Maanta waxa u ardaygaagu wax ka bartay saameynta xoogga leh ee jimicsigu ku yeelan karo maskaxdaada, waxana u macluumaad ka helay mashruuc fasal oo la sameynayo inta lagu jiro todobaadka soo socda. Weydii inaad aragtid macluumaadka, oo gargaar iyo taageero u bixi sida ad u awoodid.

NOLOL FIRFIRCOON OO CAAFIMAAD LEH



Xoojin Maskax

Waxa u ardaygaagu dhawaan wax ka barta saameynta fiican ee jimicsigu ku yeelan karo maskaxda. Marka laga tago sameyn firfircooni jidh, waxa jira siyaabo badan oo kale oo ad ardaygaaga kaga caawin kartid inaad badbaadisid iyo in maskaxdiisu korto.

Tabo dheeraad ah oo ay maskaxdaadu ku lahaato caafimaad waa adiga oo hela hurdo kugu filan, si fiican wax u cuna, ku tababarta feejignaan oo markasta xidha koofiyadda badbaadada marka ad kaxeynaysid baasgeel!